

Waraaqda Xaqiiqooyinka Xeerka Cuntada #16

Waxa loo baahan yahay in aad ka ogaato Xeerka

WWW.HEALTHOREGON.ORG
/FOODSAFETY

Cuntooyinka Laga reebay in Shati laga qaato Maamulka Caafimaadka Deegaanka marka Maxfal Kumeelgaar ah laga isticmaalayo


Gudaha Oregon, goobaha cuntada ama ururada diyaariya ama iibiya noocyada cuntooyinka soo socda si islamarkaasba loo isticmaalo waa laga reebay in ay shati qaataan iyo shuruucda ORS 624.010 illaa 624.120 iyo ORS 624.310 illaa 440 haddii ay maxfal ka shaqaynayaan iyo haddii kaleba:

- Noocyada macaanka aan khatarta keenayn, sida nacnaca ama macmacaanka, oo ay kamid yihiin, laakiin aan ku ekayn caramel-ka cusbada leh, fudge, marshmallow bars, shukulaatada lagu daboolay marshmallow, iyo nacnaca adag.
- Jalaatada horay loo sii seejalay si looga ganacsado iyo budooyinka la barafeeyay oo qofba gaar looga iibinayo
- Waxsoosaarada ganacsi ahaan loo gasacadeeyay, hilibka yaryar ee qalal ee laga ganacsado, qolfaha, nutmeats, qaloonka iyo cuntooyinka horey loo seejalay sida jibsiga baradhada ah, pretzels iyo crackers
- Cabitaanada dhalada kujira ee aan la furin iyo kuwa aan khatarta keenayn, oo ay kujiraan cabitaanada khamriga ah oo islamarkaas la isticmaalayo
- Kafeega iyo shaaha, ay kujiraan waxyaabaha aan khatarta keenayn
- Cabitaanada qabow iyo kuwa kuluul ee aan khatarta keenayn kuwaas oo loo diyaariyay in islamarkiiba la isticmaalo kuwaas oo laga keenay iskudarka budo si gaar gaar ah u seejalan iyo biyo ganacsi oo dhalo kujira
- Cuntooyinka ama cabitaanada aan khatarta keenayn ee ay bixiyeen ganacsiyada ama ururada adeegyada aan cuntada ahayn ayada oo aan kharash ugu fadhin isticmaalaha.

Si aad u hesho liiska howlaha/cuntooyinka laga reebay fadlan eeg OAR 333-150-0000, Qaybta 1-201.10, qeexitaanka "Goobta cuntadu kuma jirto".

Goobta cuntada ama ururka diyaariya ama iibiya cuntada aan khatarta keenayn si islamarkaasba loo isticmaalo marka la joogo madalada la isugu yimaado waxaa laga reebay in ay qaataan shatiga haddii ay:

- Shaqaalaha cuntadu kuma taabanayaan cuntada aan daboolnayn, ee u diyaarsan in la cuno gacmahooda oo banaan ayna isticmaalaan maacuunta ku haboon sida tiishka deli, qaadooyin, fargeetooyin, galooftisyoo halmar la isticmaalayo, ama qalab qaybin
- Goob gacma dhaqasho oo kumeelgaar ah la diyaariyo:



- Ogaysiis* ayaa lagu dhajinayaa meel dadweynuhu ka arki karo kaasoo sheega: "NOTICE: Food served at this location may not have been inspected by the regulatory authority" ama luuqad lamid ah oo wakaaladda maamulaysaa ay ogo-laatay (eeg bogga 2 si aad u hesho saxiix la daabici karo)
- Dhammaan waxyaabaha cuntadu ka samaysan tahay, oo ay kamid yihiin biyaha iyo barafku, waa in ay ka yimaadaan il la ogo-laaday wax soosaarkana waa in uu ahaado mid lagu soo saaray ayada oo la adeegsanayo xeerarka maamulidda cuntada ee ammaanka ah
- Iibiyeyaasha cabitaanka liinta iyo cinabka ciiriinka ah, sida liin dhanaanta, liin macaanta iyo cinabka kuwaas oo keena cabitaanka goobta madasha la isugu yimaado sidoo kalena diyaariya oona iibiya wax soosaarka ayada oo kaliya islamarkaas la isticmaalayo qof kastana gaar loo siinayo. Goobta cuntadu waxa ay kaliya ku dari kartaa cabitaanka waxyaabaha aan khatarta ahayn, ganacsi ahaantana loo diyaariyay, kuma dari karto

miraha iyo qudaarta kale ee markaas cusub. Haddii cabitaanka liinta iyo cinabka cayriinka ah ee la iibinayo ama la qaybinayo aan si gaar ah loo diyaarin si looga hortago, loo yareeyo, ama meesha looga saaro jiritaanka jeermisyada, ogaysiiska soo socda* waa in lasoo dhajiyaa, "NOTICE: This product has not been pasteurized or processed".

- Goobta cuntada ee ku iibisa cabitaanada cayriinka ah ee aan ahayn liinta iyo cinabka cayriinka ah meel madal la isugu imaanayo ah waa in ay heshaa shatiga kumeelgaarka ah ee maqaaxida.



Cuntooyinka la dubay (sida buskudada gacanta lagu sameeyo, dhoonatada iyo fruit pies), tufaaxa nacnaca ka samaysan iyo kambucha waa in ay hadda buuxiyaan shuruudaha

- [Foomka Heshiiska Cuntooyinka Laga Reebay](#) ayaa la buuxinayaa lana dhigayaa goobta madasha la isugu imaanayo inta lagu jiro dhammaan saacadaha shaqada. Waxaa dhici karta in Waaxda Caafimaadka ee Deegaankaagu khidmad ay dib u eegis loogu samaynayo foomka ay soo dallacdo.
- Wakaaladda maamulku waxaa laga yaabaa in ay shirkadda cuntada shardi uga dhigto shatiga haddii ay jiraan welwel dhanka badqabka cuntada ah kuwaas oo la xiriira shaqada adeegga cuntada shatiga laga dhaafay.

Cuntooyinka khatarta keeni kara waa cuntooyinka ka yimaada xayawaanka (cayriin iyo bisaylba), waxyaabaha dhirta ka yimaada oo la kariyay, iniinaha curdanka ah ee cayriinka ah, qaraha la jarjaray, toonta iyo saliidda la isku daray, waxyaabaha caleenta cagaaran ee la jarjaray ah iyo yaanyada la jarjaray.

Tusaalooyinka cuntooyinka laga reebay shati qaadashada aanna u baahnayn in ay buuxiyaan foomka cuntada laga reebay

- Waxyaabaha aan khatarta keenayn (fudge, caramel cusbaysan, marshmallows shukulaato lagu daboolay)
- Jalaatada horay loo sii seejalay si looga ganacsado iyo budooyinka la barafeeyay oo qofba gaar looga iibinayo
- Waxsoosaarada ganacsi ahaan loo gasacadeeyay, hilibka yaryar ee qalalan ee laga ganacsado, qolfaha, nutmeats, qaloonka, iyo cuntooyinka horey loo seejalay sida jibsiga baradhada ah, pretzels iyo crackers
- Cabitaanada dhalada kujira ee aan la furin iyo kuwa khatarta aan keeni karin oo ay kujiraan cabitaanada khamriga ah
- Kafeega iyo shaaha, ay kujiraan waxyaabaha aan khatarta keenayn
- Cabitaanada qabow ama kuwa kulul ee aan khatarta keenayn kuwaas oo laga keenay iskudarka budo si gaar gaar ah u seejalan iyo biyo ganacsi oo dhalo kujira, laguma darayo cabitaanka markaas la miiray

Tusaalooyinka cuntooyinka aan khatarta keenayn (PHF) kuwaas oo laga reebay madalaha la isugu yimaado haddii ay buuxiyaan shuruudaha cuntada laga reebay ayna soo buuxiyaan foomka.

- Buskuddada Gacanta Lagu Sameeyo
- Dhoonadada
- Rootiga shiilan (elephant ears, funnel cakes, Indian fry bread)
- Fruit pies
- Tufaaxa nacnaca lagu daray/caramel
- Shukulaato la dhexgaliyay, miraha aan PHF ahayn
- Kombucha (oo leh waxyaabo lagu daray ee laga dhaafay shatiga)
- Soda baraf leh
- Baraf macmacaan iyo midabo leh
- Baraf macmacaan iyo midabo leh oo weel dabo yuub ah ku jira
- Slushies ay kujiraan waxyaabo lagu daray oo aan PHF ahayn
- Rooti, rolls, muffins
- Cabitaanka liinta iyo cinab ka- seeko ah ama waxyaabo aan HF ahayn kujiraan, waxyaabaha ganacsi ahaanta loo diyaarsado lagu daray, laguma darayo qudaarta iyo miraha kale ee cusub
- Cabitaanada ganacsiga, sida cabitaanka tufaaxa ee Treetop, oo lagu gado galaas

Tusaalooyinka cuntooyinka u baahan shatiga kumeelgaarka ah ee madalaha la isugu imaado

- Jalaatada la dardarsado
- Cabitaanada smoothies ee leh miraha iyo/ ama qudaarta
- Qaraha jarjaran
- Saladka ay kujiraan caleemaha cagaaran ee jarjaran
- Cabitaanada qudaarta ama miraha ah, marka laga reebo cabitaanada liinta iyo cinabka
- Qudaarta la dubay sida qaloonka ku yaalla lafta
- Cuntada khatarta keeni karta ee islamarkaas la isticmaalayo

Dhammaan cuntada waa in lagu diyaariyaa goobta madasha la isugu imaanayo ama goob shati u haysata kahor madasha la isugu imaanaya.

Waxaa dhici karta in khidmad maamul ay Waaxda Caafimaadka Deegaankaagu soo dallacdo si ay dib u eegis ugu samayso una aqbasho Foomka Heshiiska Cuntada Laga reebay shatiga

NOTICE:

Food served at this location may not have been inspected by the regulatory authority